

**Ku: Odayaasha Dhaqanka Beelaha Hawiye**

**OG: Safiirka Mareeykanka**

- : US AFRICOM**
- : US security firm Banck Roft/US Africom**
- : Midowga Yurub**
- : Safiirka Ingriiska**
- : Turksom**
- : ATMIS**

**OG: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**: Madaxweynaha Dawladda Koofur Galbeed**

**Ka: Abdullahi Mohamed Nur**

E-mail: [abdullahimohamednur@outlook.com](mailto:abdullahimohamednur@outlook.com)

**Taariikh: 05/September/2024**

**Nabad Kuwada Noolaanshiyaha Waa Muhiim**

**Waxa Beesha Gaajeel Waddo waa Dhul Boob iyo Gardarro Garab og**

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

السَّلَامُ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَةُ اللَّهِ وَبَرَكَاتُهُ

**Salaan ka dib,**

**Mudaneyaal Dhaqanka Beelaha Hawiye, Waxaan idin xusuusinayaa**

**Soo yaal taarikheed (Gumeysiga ilaa Xurriyadda Dalka)**

Melbourne 05/08/2024 (banooda)-Kahor soogelitaanka Dalka ee Gumeysiga, Soomaalida waxeey u kala degganeyd beelo. Beel kastana meel cayiman oo loo yaqaano ayeey degganeyd. Hasa ahaatee dhaqanka soo jireenka Soomaaliyeed wuxuu ku dhisnaa is kaalmeesy oo layska kaalmeesanaayey mararka aay meelo abaaro ka dhacaan in dadkii abaarta ku dhacdey daaqsin u raadsadaan meeshii roob heshey. Iyo guud ahaanba dadka deggan meelaha aan daaq fiican lahayn inay soo aadaan meelaha daaqa fiican leh. Waxaase dhici jirtey in dadkii naq iyo doog soo doontey ii dadkii marti geliyey iney isdagaalaan sababo kala duwan dartood oo u badnaa daaq iyo biyo, waxaana lagu xallin jirey xeer Soomaaliyeed soo jireen ahaa iyo Shareecada Islaamka. Beesha Gaaljeel deegaanka Daafet wax deegaan ah kuma lahay, waxeey u imaan jireen daaqsin xilliyada roobka. Dhulka shanta Alemo iyo Garre wuxu fidsanyahay ilaa Gowni ii Goobaadin

dhanka waqooyi Gaajeelna ma soo dhaafi jirin xadkaas marka laga reebo mar mar islaanimo iyo baniadminimo loogu oggolaannjirey daaq iyo. Hase ahaatee, iyadoo axsaankaas loo sameeynaayo ayey markasto dagaal hurin jireen. Gaaljeel iskama laha, Eelooow Waambata, Yaaq bariweyne, Leego ilaa Jameecada Dheenta iyo Qardho. Soomaalida waxeey tiraahdaa baadi kuugu raagtey inaad leefahay baad moodaa.

Markii gumeysiga Taliyaaniga yimid dalka, waxaa bilowdey nidaam dowladnimo, in dhaqdhaaqa dadka iyo xoolahooda la xakameeyoo oo lala socdo. Sidaas darteed waxaan wada ognahay in beelaha qaar gaar ahaan Gaaljeel markeey Wanla weyn daaqsin u soo aadi jireen waxaa lagu soo dari jirey ama la soo raacin jirey askartii Munishiibiyada oo la dhi jirey “Ilaalo”. Ilaaladu waxeey Gudoomiyaha Wanle weyn u keeni jirtey warqad uu soo qorey Gudoomiyaha Gumeystaha degmada Beled weyn ama kan Buula Burte oo aay ku codsanayaan in loo oggolaado intaas tiro oo dad ah iyo xoolahooda, tusaale boqol qoys oo xoolo daaqsin usoo aadeyso degmada Wanle weyn, intaas bilood ayeey indinla joogi doonaan, wixii dhib ah aay geestaan annagaa ka masuul ahoon haallindoona. Iyaga iyo xoolahooda u oggolaada biyo, baad iyo nabad. Kadib dagaalkii labaad adduungka, Qaramee Midoobey waxeey go’aan ku gaareen in Taliyaaniga uu Soomaaliya gaarsiyo xurnimo dhammaytiran 10 sano gudahoodna ku gaarsiyo.

### **Wisaayadii Xurriyad Gaarsiinta Soomaaliya ee Taliyaaniga**

Inta u dhaxeeysey 1950 ilaa 1960, Taliyaaniga wuxuu billaabey inuu diyaariyo axsaab siyaasadeed si waddanka uu u hanto xurnimadiisa. Waxaa sameeymay axsaab badan aay ugu weeynaayeen Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL) iyo Hisbiga Dastuur Mustaqil Somali (HDMS). Maadam faktii hore SYL aad uga taageero badnayd mucaaradka, Taliyaaniga wuxuu xiriir hoose kula shiraakoobey xisbiga SYL oo ay horboodayeen beelaha reer miyiga ama u badnaa xoolo dhaqatada guurguura una aqoonsadey xisbiga (majotansada).

SYL waxey durba ku fekertey inay cabburin siyaasadeed kula dhaqanto axsaabta mucaaradka gaar ahaan HDMS, waxeeyna billawdey handaad, cabsi gelin iyo inay fuliso dilal siyasadeed oo kii ugu horreeyey ahaa dilkii foosha xumaa ee Ustad Usman Moahemd Huseein oo dad reer mudug ah ku dileen gurigiisa maxaa yeeley SYL uu horey oga tirsanaa ayuu ka soo baxay wuxuu ku soo biirey HDMS ka dib markuu daremey in dadkaan reer guuraaga ah iyo beeraleeyda koofureed aan ku wada noolaaalan Karin nidaamka laga soo guuriyey Taliyaaniga ee ah nidaam dowlad dhexe oo awood badan, wuxuuna la yimid fikirka Federlaaka kaasoo dartiisa loo diley 1953<sup>1</sup>. Sidoo kale Taliyaaniga iyo SYL waxeey wada fuliyeen shirqoolkii lagu diley Muhammad kamaludin Salah 16 April 1957<sup>2</sup> ee Muqdisho oo looga dan laha in lagu xiro rag uu ka mid ahaa Abduqaadir Mhamaed Adan (ZOPP) oo isagu qaaday fikirka Federaalka ka dib dilkii Ustaad Usmaang.

Inta lagu guda jirey xurriyad gaarsiinta Soomaalida, Taliyaaniga wuxuu qabanqaabiyey tijaabooyiin doorasho ee nidaamka axsaabta badan. Ha ahaatee Soomaaliya wiligeed

kama dhicin hal doorasho xor iyo xalaal ah maxaa yeeley SYL oo isu arkeysey xisbiga ugu taageerada badan waxeey mar kasto caadeeysatey inay ku shubato iyadoo adeegsaneeysa oggolaashiyaha Taliyaaniga oo isagu mar kasto indhiha ka qabsanaayey gaboodfallada SYL marka laga reebo marka uu dil dhaco sida dilka Ustaad Usmaan iyo dilkii Xubing gole deegaanka Luuq oo HDMS ka socday Moallim Omar Mayo 1959kii<sup>3</sup>. Ing kastoo Soomaaliya xuroowdey, isku socodka ummadda Soomaaliyeed oo shuruud la'aan eh ayaa billawdey, hase ahaatee beel waliba deegaankeedi waa looga dambeeynaayey.

Laakin dhul goosadkii aseendiyaashii webiyada ee Taliyaaniga meeshoodeey ka sii socdeen siyaasiinta waaweeyn reer guuraaga ahna sisaas oo kale ayeey dhul beereed badan kaga qaateen daka reer Shabeellaha hoose inyagoo adeegsanaya awood dowladeed dadkiina sidii Taliyaaniga ayeey u adoonsadeen; musuqmaasuqana wuxuu gaarey heer aan lagaba ahdli Karin kaasoo sababaey in dalka ay ka abuurmaan axsaab farabadan ilaa iyo 90 ka badan oo qabiil ku saleysan waxaa siyaasi kasta madaxa ka galey in kursiga lagu gaaro boobka hantida shacabka iyo tan qaranka. Isagoo xaalku sidaas yahay ayaa Madax weynihii markaas Abdirashiid Ali Sharmarke ayaa la diley, askartana dalka kula wareegtey afgambi October 1969kii.

Dowladdii askarta waxeey soo rogtey nidaam hanti wadaag ah oo dalka iyo kheyraadkiisa aay dowladdu leedahay oo ay maamusho aanan jiri Karin cid lahaansho sheegan karta aan ka ahayn dhaqmaad. Iyadoo ay saas tahay ayaa haddana lahaanshiyaha beeled ee dhulka iyo degmooyinka sii socdeen iyadoo looga dambeeynaayey beesha degmada iska leh ruqso bixinta deegaan (guri) iyo ganacsiba. Laakin Kacaanku wuxuu soo saarey sharcigii dhulka beeraha ee 1975 iyo hirgelinta ololihii dib u dejinta dadkii laga soo rarey abaartii Daba dheer ee gobollada woqooyi, bari iyo gobollada dhexe oo geddiggod ah reer Maxaa tiri. Hal qof lagama soo qaadin gobolka Bakool oo isagana soo gaartey abaartaas Daba dheer.

Nasiib darro, waxaa dhacdey Beesha Gaaljecel iyadoo ka faaideysaneysa nidaamka hantiwadaagga ineey si musuqmaasuq ah ugu yeelatey Degmooyinka Wanle weyn, Buur Hakaba iyo Diinsoor min todoba nabadoon. Nabadoon beesha Gaaljel kuyeelato Wanle weyn ee ugu horreeyey oo la dhihi jireey Muumin Xareed waxa laga soo beddeley Beledweyne 1974tii (Yaab nabadonn la soo beddelaayo ma askarbaa?) kacaanka ayaa sidaas yeelay. Ka dib inta kale si musuqmaasuq ah ayey ugu darsatey beeshu maadaama laalushku shaqeeynaayey. Laakin todobadii nabdoon waxeey eber ka noqdeen Degmooyinka Wanle weyn, Buur Hakaba iyo Diinsoorba ka dib burburkii hukunkii askarta iyo dagaalka sokeeye sababna u aheyd dhaqan xumida, abaal darrida, iyo is xaq dhowr la'aanta beesha gaaljel oo had ii jeer dagaal uun hurineeysey iyadoo arrintaas oga gol leh inaay xoog kula wareegto qeeb ka mid ah deegaannada Shanta Aleemo gaar ahaan Yaaq Bari weyne iyo nawaaxigiisa.

Bur burkii qarangka ka dib, umadda Soomaaliyeed waxeey u kala laabatey sidii gumeysiga ka hor oo beel kasto meeshii deegaankeedi ahaa u laabatey, marka laga reebo

beelo iyaga xoog ku qabsadey deegaan aaysan lahayn sida beelaha USC oo xoog ilaa hadda ku haystaan qaar ka mid ah deegaannada gobolka Shabeellaha hoose aay ka mid tahay degmada Wanle weyn.

Gobolka shabeellaha hoose waxaa si dhab ah ugu soo duuley beelo ka yimid gobollada Hirshabeelle iyo Gal Mudug oo deegaano badan oo isugu jira daaqsin, dhul beereed iyo deegaanba sharci darro xoog ah ku qabsadeen min 1991dii ilaa haddana ku haystaan. Arrintaasna waxeey salka ku haaysaa dardaarankii USC oo ahaa meel kastoo aad xoreeysan adinkaa iska leh qabsada oo dega dadka deegaankana ku shaqeysta adinkoo u dawladeeynaayo.

Tusaale ahaan beesha Gaaljeel oo Shanta caleemo weligood biyo ii baad siin jireen oo mar kasto soo dhoweyn jireen waxeey ku dhiiratey inay isku daydo inay qabsato qeeb deegaannada daafeed ka mid ah, xoog ku degto aayna lahaanshiyaha dhulkana shegato daaq umbeey ku joogi jirtey oo loogu oggolaaye.

Waxaa la wada ogyahay iney ka soo dex dhaceen beelaha Shanta Aleemo iyo Gaajeel. Dagaallo qaraar laga soo billawo 28/02/1991 ilaa maantadan la joogo. Gaajeel ballanna maleh oo dhowr jeer waanwaan laysku dayey aay had iyo jeer baaqanaayeen oo aan imaaneeynin fadhida di u heshiinta oo aay ugu muhiimsanaayeen kuwii 1994 iyo 2020. Dhaqan xumadooda waxaa ka mid ah iyagoo gogol dib u heshiissin laga sugaayo ayee weerar gaadma ah ku soo qaadi jireen Shanta Aleemo. Sidaasna waxeey u sameeynaayeen waxeey maskaxda ku haystaan dardaarankii USC oo ah in dhul xoog lugu qaato sida ay afkooda ka soo yeertey “haddaang dalka USCyaa qabatii idinka racyaa tihiine racyinimadiina ogaada”.

Annaga wax baan ka degganahay dhulka Hawiye, gaar ahaan mgaalooyinka Hirshabeelle iyo Galmudugba si nabad iyo ilbahnima ah ayaan kula degganahay, kula noolnahay ka dhex shaqeysanaa, kuma haysano Beledweyn, Bullaburte ii meelaha kale Hawiyuhu leeyahay, lama sheegano, kulamana dagaallano. Soomaalida waxey tiraahdaa ficil feerahaga lagama uumin fillaangkaagaa ku tusa. Ficilka Beesha Gaajeel waddo ma aha mid lagu wada jri karo oo lagu wada noolaan karo waa dhul boob cad beelaha Hiyena la ogyihiin waana arrin aan marna la oggolaan karin.

Ururka United Somali Congress (USC) wuxuu ahaa ururka ugu tungka weeynaa oo go'aansadey in marnaba Soomaliya heshiis ama dib u heshiisiin ka hirgelin illaa aay dhulalka aay doonayaan gaar ahaan gobolka shabeellaha hoose xoog ku qabsadaan, waxeeyna dhallinyaradooda ku soo dagaal geliyeen meeshad xoreeysaan idinkaa iska leh dega. Sidaas darteedna USC u diidey in la wareejiyo oo dadkii lahaa loo wareejiyo hanti magauurtadii la laga haystey reer shabeellaha hoose<sup>4</sup>, dadkoodina inta la qixiyey ay xerroyinga Muqdisho ku yihiin Barakacayaal<sup>5</sup> magacoodana hati xaaraan ah lagu sameeysto

Iyagoo dardaarankii USC ka duulaaya, haddana xukunka isku dilaaya ayaa Ali Mahdi ii Aidiidba ay UNOSOM ka dhaadhi'yeen in Gaaljeel xoolo iyo caano keeno suuqa Wanle

weyn, sidaas darteed aay beesha Gaajeel xaq u leedahay in golaha deegaanka Wanle weyn laga siyo xubin waktigii UNOSOM oo Admiral J. Howe hogaaminaayey iyadoo beelaha Shan Aleemo diidanyihiin ayaa UNOSOM qasab hal hubin ugu dartey. *Ilaaheey ha u nahariistee warqaddii Suldaang Haaj Maahi Huseeng uu ugu jawaabey Admirald J. Haw halkeey ku lifaaqintahq* <sup>lifaaq</sup>.

Sidaas oo kale ayaa beelo kale Hawiye ah deegaano Gobolka Shabeellaha hoose ay xoog ugu haystaan iyadoo weliba meelaha qaar adoonsi uu ka jiro. Waxaan sugeeyney ama aan filayney in abaal la noo haayo maadaama abaartii Dabdheer aan ka soo saarney, bal iska daaye waxaa lagu mashquulsanyahay ilaa hadda sidii xaqeena asaasiga ahaa lanooga qaadi lahaa, dhulkeena ugu horreeyo in bandanna horey awood dawladeed iyo qori caarddiis lanooga xoogey. Dhul ciwal ahna lanaga siinin dhulalkii mashaariicda horumarinta dalka lanooga qaadey, dadkii dhulka laga qaadey waxeey buux dhaafiyeen xeroyingka Muqdisho oo magacoodana hanti xaaran ah lag sameeyo<sup>6</sup>.

Arrintaasna waxaa dhiirri gelinaaya oo raalli ka ah hadba doowladda markaas joogto. Dawladda Federaalka uu Madaxweyne ka yahay Mudane Xasan Sheekh Mahamuud, Xukumadiisa Damuljadiid iyo Ciidamada US security firm Bancroft oo fadhigeedu yahay BalliDoogle oo hoostimaadda maamulka Koofur Galbeed gaar ahaan degmada Wanle weyn aanse ka amar qaadanin.

Waxaa arrimahan aan kor ku soo sheegney daliil u ah in ciidanka DANAB iyo kan Xoogga Dalka Soomaaliyeed lanu xaqiraayo oo qeebteena lanaga siineeynin bal iska daaye wax alla wixi yaraa Digil Mirifle iyo Biimaal, Shabeellaha hoose guud ahaan oo ku jirey Danab iyo Xoogga Dalka sarkaal ahaa ee joogey Balli Doogle inta la shirqooley laga soo eryey oo laga soo sifeeyey. Ururrada DANAB ka hawlgala Maamulada kale aay hoos yimaadaan oo aay ka amar qaataa maamulladooda laakin DANABta Balli Doogle kama amar qaadadto Maamulka Koofur Galbeed oo aay ku hoos nooshahay sababtoo ah farriin iyo tageero aay Xukuumadda Damul Jadiid ka haysataa.

Ilaa 100% Saraakiisha iyo taliyeyaasha ciidamada ka hawgala Gobolka Shabeellaha hoose iyo DANABba waxaay ka soo jeedaan beelaha Hawiye. Dadka deegaankana taliyenimada iyo dallacaadaha waa laga xaarantimeeyey oo loo diidey si xoog ku haysashada gobolka iyo adoonsiga dadkiisa iyo Iisbaarada u socdo oo u hirgalo.

Waayahan dambe waxaa soo shaacbahay in DANABta fadhigeedu yahayay Balli Doogle aay difaaceeyso hubna siineeyso mooriyaanta cusub oo ka soo duushey Hirshabelle oo uu horkacayo Hildhibaan Daahir Amiin Jeesow oo dirmaanyo ka haysta Beelaah hawiye qaarkood gaar ahaan Habar Gidir ityo Abgaal (gardarro grab og). Ka dib markii dagallada ka dhex dhacay shanta Aleemo iyo Gaajeel, oo Maamulka Koofur Galbeed soo dhax galey si waan waan iyo dib u heshiissin looga dhex dhaliyo waxaa diidey Beesha Gaajeel oo ku adkaysanaysa in mooriyaanta aay dadka Soomeeliyeed waddada maraya dhacaan kufsadaan baadaan oo dilaan aay meesha u joogaan iayagoo leh waa deegaankeena.

Intaas ka dib, Koofur Galbeed waxeey go'aansatay inay awood ciidan adeegsato si mooriyaanta waddada looga eryo dadka ku safraayana nabad u helaan. Isla markiika maaulka Damul Jadiid wuxuu soo saarey isagoo ku hadlaaya afka Wasiirka Gaashan Dhigga Abdulqadir Mohamed Nur (Jaamac) in Gegida Dayuurada Balli Doogle aay ka soo degi Karin dayuurad sidda ciidan ka yid gobolka Baay, US Backrofna go'aankaas aay ayiddey illaa xildhibaanada Koofur aay Ka dacwoodaan. Maamulka Koofur Galbeed waajibaa ka saaran nabadgeliyada waddada isku xirta Muqdisho ilaa Baay, Bakool iyo Gedo, xaq bayna u leedahay inay amaangka siday xal u aragto u sugto shacabkeendana waa ku taagersanyahy.

Is xusuusinta sooyaalka taariikheed ka di haddaba, **Soomaalida guud ahaan**, waxaan u sheegeynaa in beesha Gaajeel dhulkaas aay u doodeeyso daaqsin uun aay ku joogetey oo loo oggolaay xaqna uma laha inay sheegato. Haddii aay colaadda sii waddana waxeey weyn doontaa daaqsingka iyo biyaha maxaa yeelay dad nabad raba ayaa lala noolaan karaa laakin dadaan nabad rabin lalama noolaan karo waa layska dheereeynaa haddi Alla idmo.

**Gaar ahaan qaar ka mid ah Beelaha Hawiye** oo iyagu caddaystay cadowtinimada aay u qabaan Digil Mirifle gaar ahaan iyo reer shabeellaha hoose guud ahaan, waxaan leenahay is dejhiya walaalyaal, Rabbigii nawada abuurtay ka baqa, dhulkiina waad garaneeysaan annaga idinkuma haysano dhulkiina adinkaa dhulkeena noogu yimid oo xoog nooga haysta ilaa hadda oo meel kastoo Shabeellaha ka mid ah isbaaradiina lacagta nooga dhacdaan. Waxba kama qabno inaad nala noolaataan, waxaanse marnaba yeeleeynin dhulkaagaa kuula qabsanaa (ku qabso ku qadimeysid) si xog ah iyo si xiilo ahba si aad u yeelataan ilaa abadud abad sidaasna aad Gaajel gardarrada ugu taageersantihiin inuu xoog ku sii haysto dhul aysan lahayn intiina kalena beeraha wabiga shabeellaha hoosee aad xoog ku haysataan waa arrin aan marnaba la yeeli karin. "maroodi haddi biyo la siiyo wuu cabaa, haddii loo diidana wuu cabba" ma socondoonto in shaa Allahu. Caqliga iyo caddaladda ha shaecyaano.

Arrintaan hadda soo cusboonaatey Masar iyo Itoobia oo qaar ka mid ah beelaha Hawiye si ba'an ugu weerareey Xildhibaanada, sha'abka iyo maamulka koofur galbeed ka dib markii reer bakool aay aragtidooda ka dhiibteen meesha aay dantooda ku jirto xildhibaanada federalkana ku raaceen. Reer Koofur Galbeed kama arkaan maslaxaddoda Soomaalinimada beenta ah oo khiyaanad huwan maxaa yeelay Soomaalinimada aad baa loogu dulmiyey ilaa haddana lagu dulminayaa. Reer shabeellaha hoose xurriyad ma haystaan, gumaad iyo gumeysi baad ku haaysaan.

Waxaa la gudboon **Madaxweyne Hassan Sheekh Mahamud** iyo Xukuumadiisa Damuljadiid ineey dhedhexaad u ahaadaan ummadda Soomaaliyeed ha iska deeyaan qabyaaladda, musuqmaasuqa baahsan iyo sed bursiga. Ha ilaaliyaan Dastuurka dalka. Dowladda markii aay heshiisyo caalami ah soo gasho waa inaay geeyaan Baarlamaangka si uu u ansixiyo. Waxaa dhoor jeer hore u dhacday in Heshiis caalami la soo galo Baarlamaangka la kenin waana kali talisnimo. Beelaha Soomaaliyeed ee ku dulman

maamulka Damuljadiid waa ineey ka helaan xaqooda Dowladda federaalka ay ku leeyihiin maadaama muwaadhiniinta Soomaaliyeed aay simanyihiin. Madaxweynaha iyo xukuumadiisa waa inaay caddaladda ka shaqeeyaan; Youwmul qiyaamana ogaataan in Allaha ina wada abuurtey idinla xisaabtami doono maxaa yeelay adinkaa qaadey masuuliyadda. Hubka qarangka waa inay si caddalad ah ugu qeeybiyaan maamullada ee aan qolo u roonaanin qolana ugu darnaanin. Ciidamada, gaar ahaan saraakiisha iyo taliyeyaasha waa inaay si siman ula macaamilaan. Soomaalidu waxeey arkaysaa in Madaxweynaha iyo beeshiisa si aad u ba'an u ximinayaan una necebyihiin beelaha dega gobolka shabeellaha hoose gaar ahaan Digil Mirifle. Ha joojiyaano naceeybka xad dhaafka ah si ummaddu isu raacdo una midowdo. Beelo badan ayaa ku dulman awood qeebsiga dalka iyo qeeybaha dowladda oo dhan.

Annagu ma diidanin wada noolaansho iyo is dheh gal, waxaan diidannahay dhul xoog ku sheegasho iyo xoog deegaan ku sameysasho iyo xaqiraad jooqto ah. Caqliga addanaha wuu dareemi karaa haddii qof walaalkii xaqiisa u diido, mar kastana xaqiraayo, dhulkiisana ka xoogaayo, inuu gumeeystana doonaayo qofkaas wuxuu macin bidiya cid alla cididi iyo meeshii dantiisa iyo tan beeshiisa ku jirto.

**US security firm BANCKROFna** waxaan leenahay deegaanka Digil Mirifle ayaad ka shaqeeyneeysaan waxaan indinka sugeeyney inaad Digil Mirifle mudnaan siineeysaan gaar ahaan Shanta Aleemoo oo aad dhulkeeda ku shaqeeyneeysaan ee idinkama sugeeynin inaad beelo meelo fogfog ka yimid aad mudnaan siineeysaan maxaa yeeley reer Wanle weyn shaqo ma siisaan, idinkama helaan mashariicda aad ka waddan Balli Doogle, sidaas oo kale wax qandaraas ah shirkadaha Digil Mirifle idinkama helaan, bal waxaa kheeyraadka deegaamadeena si jooqta ah ooga faaideysta shirkado shisheeye oo gobollo kale ka yimid.

**US Security Bancroft** waa inaad dhexdhexaad ka noqotaan arrinta dhex taal Shanta Aleemo iyo Gaajeel. Waa ognahay in ay mar kasto ku gabbanayaan xerada balli doogle hub iyo saanadna laga soo siiyo oo Danabta aad adinka tababartaan oo Hawiyaha ah aay soo siiyaan aadna la ogtihiin. Intaas ka sokoow, shaqooyinka ka socda Balli doogle iyo mashaariicda waa inaad xaqooda ka siisaan Shanta Allemo oo ah dadka dhulka iska leh haaddey ahaan lahayd shaqo muruq maal iyo kunturaad mashaaricba.

### **Xigasho/References:**

- 1- Mohamed Trunji, May 26, 2018, UNTOLD HISTORY: A FALLEN HERO MAY 1953: THE FIRST POLITICAL ASSASSINATION IN SOMALIA, THE CASE OF USTAD OSMAN HUSSEIN. [https://hiiraan.com/op4/2018/may/158308/may1953\\_the\\_first\\_political\\_assassination\\_in\\_somalia\\_the\\_case\\_of\\_ustad\\_osman\\_hussein.aspx](https://hiiraan.com/op4/2018/may/158308/may1953_the_first_political_assassination_in_somalia_the_case_of_ustad_osman_hussein.aspx)
- 2- Annalisa Urbano, Doctor of Philosophy The University of Edinburgh 2012, P 170. <https://era.ed.ac.uk/bitstream/handle/1842/7756/Urbano2012.pdf?sequence=>
- 3- Mohamed Trunji , How the invalidation of the election results of Lugh Ferrandi by the Court reawaked tribal feelings within the SYL Party 1959.

[https://www.hiiraan.org/op4/2021/july/183403/1959\\_how\\_the\\_invalidation\\_of\\_the\\_election\\_results\\_of\\_lugh\\_ferrandi\\_by\\_the\\_court\\_reawaked\\_tribal\\_feelings\\_within\\_the\\_sy\\_l\\_party.aspx](https://www.hiiraan.org/op4/2021/july/183403/1959_how_the_invalidation_of_the_election_results_of_lugh_ferrandi_by_the_court_reawaked_tribal_feelings_within_the_sy_l_party.aspx)

- 4- The United Nations and Somalia 1992-1996, Page 265  
<https://archive.org/details/httpsdigitalibrary.un.orgrecord2051181nen>
- 5- Human Rights Watch: Hostages of the Gatekeepers, Abuses Against Internally Displaced in Mogadishu, Somalia  
<https://www.hrw.org/report/2013/03/28/hostages-gatekeepers/abuses-against-internally-displaced-mogadishu-somalia>
- 6- Christian Webersik, Fighting for the plenty—The banana trade in southern Somalia, 2003.  
<https://www.tandfonline.com/doi/full/10.1080/13600810500099683>

**Qore: Abdullahi M Nur**

Lifaaq

